BAYAANKA MACLUUMAADKA TALLAALKA

Tallaalka Gawracatada, Teetanaha, iyo Xiiqdheerta/Kixda (Td ama Tdap)

(Teetanaha-Gawracatada ama Teetanaha-Gawracatada-Xiiqdheerta)

Waxaad u Baahan Tahay Inaad Ogaato

Bayaanno Macluumaad Tallaal oo farabadan ayaa lagu heli karaa luqadaha Isbaanishka iyo luqado kaleba.
Ka eeg www.immunize.org/vis.
Hojas de Información Sobre Vacunas están disponibles en Español y en muchos otros idiomas.
Visite http://www.immunize.org/vis

1 Waa maxay sababta la isu tallaalayo?

Teetanaha, **gawracatada** iyo **xiiqdheerta/kixdaa** ayaa noqon kara cudurro daran.

TEETANAHA (Lockjaw) waxaa uu qofka ku ridaa murqaha oo is dhufta ama gariira oo xanuun badan leh iyo qallafsanaan, badiyaa ah dhammaan oogada oo idil.

- Waxay u horseedi karta murqaha madaxa iyo qoorta oo giijisma markaana qofku uusan furi karin afkiisa ama waxba liqin karin, ama mararka qaarkood xitaa neefsan karin. teetanaha ayaa disha qiyaastii 1 qof 5-tii qof ee cudurku ku dhaco.

GAWRACATADA (DIPHTHERIA) Waxay sababi kartaa in xuub qaro leh uu daboolo xagga dambe ee cunaha.

- Wuxuu u horseedi karaa dhibaatooyin neefsasho, baaralaato, wadnaha oo shaqadiisa gaba, iyo xitaa dhimasho.

XIIQDHEER AMA KIX (Whooping Cough) ayaa sababa qufac daran oo muddo dheer socda oo horseedi kara dhibaato neefsasho, matag, iyo hurddo qas gasha.

- Waxay keeni kartaa miisanka qofka oo hoos u dhaca, isku-siideyn kaadi ama saxaro, feedhaha oo dilaaca iyo in qofku miyir ku bello qufaca aadka u daran. Illaa 2 ka mid ah 100-kii tobaneeyo-jir iyo 5 ka mid ah 100-kii qaangaar ee qaba xiiqdheerta ayaa la dhigaa isbitaalka ama yeesha murgis xaalad caafimaad, oo ay ka mid tahay nuumooniya (oof wareenka) iyo geeri.

Saddexdan cudur ayay dhammaantood keentaa bakteeriyo. Gawracatada iyo xiiqdheerta waxay ku faafaan qof ka qof. Teetanadu waxay oogada ka gashaa meel jeexan, xagashada, ama dhaawaca.

Mareykanka ayay soo mari jireen sannadkii illaa 200,000 xaalado gawracato iyo xiiqdheer kahor intaan tallaallada la helin, iyo boqolaal xaaladood oo teetano ah. Wixii markaa ka dambeeyay, xaaladaha teetanaha iyo xaaladaha gawracata ayaa hoos u dhacay illaa 99% iyo xaaladaha xiiqdheerta oo iyaguna hoos u dhacay 92%.

Carruurta ka yar da'da 6 sano iyo kuwa ka yar ayaa la siiyaa tallaalka **DTaP** si looga ilaaliyo cudurradan. Laakiin carruurta, da' roon, dhowr iyo toban jirka, iyo qaangaarka ayaa u baahan iayaguna in laga badbaadiyo.

2 Tallaallada dhowr iyo toban jirka iyo qaangaarka: Td iyo Tdap

Laba tallaal ayaa jira oo ka ilaaaliya cudurradan dadka ah da'da 7 sano iyo kuwa ka weyn:

- **Tallaalka Td** ayaa sannado badan la isticmaalayay. Wuxuu ka hortagaa teetanaha iyo gawracatada.
- **Tallaalka Tdap** ayaa la sharciyeeyay gudihii 2005. Waa tallaalkii ugu horreeeyay ee loogu talagagay dhowr iyo toban jirka iyo qaangaarka ee ka ilaaliya xiiqdheerta iyo waliba teetanaha iyo gawracatada.

Qiyaas xoojin ah oo Td ayaa lagu talinayaa 10 sanno kasta oo kale. Tdap waxa la bixiyaa kaliya hal jeer.

3 Tallaalkee, iyo goorma?

Da'aha 7 illaa 18 sano

- Qiyaas Tdap ayaa lagu taliyay in la siiyo da'da 11 ama 12. Qiyaastan ayaa la siin karaa laga bilaabo da'da 7 caarruurta ay dhaaftay qaadashada hal ama in ka badan qiyaasaha tallaalka DTaP.
- Carruurta iyo dhowr iyo toban jirka aan helin taxanaha buuxa ee tallaalada DTaP illaa da'da 7 ayaa ah inay dhammeystirtaan taxanaha iyaga oo isticmaalaya isku-jirka Td iyo Tdap.

Da'da 19 iyo kuwa ka weyn

- Dhammaan qaangaarka waa inay qaataan qiyaasta xoojinta tallalka Td hal jeer 10-kii sanaba. Dadka qaangaarka ah ee ka hooseeya 65 sanno ee aan waligood qaadan tallaalka Tdap ayaa ah inay qaataan qiyaas Tdap si ay ugu noqoto qiyaasta xoojinta ah. Qaangaarka 65 jirka ah iyo kuwa ka weyn *ayaa laga yaabaa* inay qaataan hal qiyaas xoojin tallaalka Tdap.
- Dadka qaangaarka ah (oo ay ku jiraan haweenka laga yaabo inay uureystaan iyo qaangaarka 65 jirka ah iyo kuwa ka weyn) ee filaya inay u-dhawaan soke la yeeshaan ilmaha ka yar da'da 12 bilood ayaa ah inay qaataan qiyaas tallaalka Tdap si ay uga caawiso ka ilaalinta ilmaha ee cudurka xiiqdheerta.
- Hawlwadeennada daryeelka caafimaadka ee si toos ah taabasho ula leh bukaannada ku jir isbitaallada ama rugaha caafimaadka ayaa ah inay qaataan hal qiyaas oo ah tallaalka Tdap.

Kahortagga Kadib Dhaawac

- Qof si xun meeli u jeexanto ama gubto ayaa u baahan qiyaas tallaal Td am Tdap si looga ilaaliyo cudurka teetanaha. Tdap waa in loo isticmaala cid kasta oo aan horay u qaadan qiyaasta tallaal. Td waa in la isticmaalaa haddii aan tallaalka Tdap aan la heli karin, ama waa in la siiyo:
  - cidii kasta ee horay u qaadatay qitaasta tallaal ee Tdap,
  - carruurta da'da 7 illaa 9 sano jirta ee dhammaystirtay taxanaha DTaP ee carruurnimada, ama
  - qaangaarka 65 jirka ah iyo kuwa ka weyn.

Haweenka Uurka leh

- Haweenka Uurka leh ee aan waligood qaadan qiyaasta tallaalka Tdap ayaa ah inay qaataan, kadib 20 usbuuc oo uur ah iyo sida la doorbidayo markay tahay xilliga 3-aad ee dambe ee uurka. Haddii ayna qaadan Tdap markay uurka leeyihiin waa inay qaataan qiyaas tallaal marka ugu horreysa ee suurtagalka ah kadib ummulitaanka. Haweenka uurka leh ee horay u qaatay Tdap ee u baahan tallaalka teetanaha ama gawracatada markay uurka leeyihiin ayaa ah inay qaataan Td.

Tallaalka Tdap ama Td waxa la siin karaa xilli la mida sida tallaallada kale.

4 Dadka qaarkood ma aha in la tallaalo ama waa inay sugaan

- Ciddii mar uun ku yeelatay falgal dareen-celin ama xasaasiyad nafta halis u ah kadib markay qaateen qiyaas tallaallada teetanaha, gawracatada iyo xiiqdheerta oo leh talaalka waa inayna qaadan Td ama Tdap.
- Qof kasta oo ku yeeshay ficil-celin ama alerji daran waxyaabaha uu ka kooban yahay tallaalku waa inayna qaadan tallaalkaas. U sheeg dhakhtarkaaga haddii qofka la tallaalayo uu leeyahay wax alerjiyo daran ah.
- Qof kasta oo kooma galay, ama yeeshay suuxdimo badan ama dheer gudaha 7 maalmood kadib qaadashada qiyaasta tallaalka ee DTP ama DTaP ayaa ah ineysan qaadan Tdap, haddii aan sabab kale oo aan ahayn tallaalka la helin. Dadkan ayaa qaadan kara Td.

U.S. Department of Health and Human Services
Centers for Disease Control and Prevention

- Kala hadal dhakhtarkaaga haddii u qofka qaadanaya tallaallada midkood uu
  - leeyahay suuxdin (qallal) ama dhibaato ah habdhiska dareemayaasha,
  - uu yeeshay barar daran ama xanuun daran kadib qiyaas tallaal hore oo ah DTP, DTaP, DT, Td, ama Tdap, ama
  - qabay Ciladda Guillain Barré (GBS).

Qofkii kasta ee yeesha jirro dhexdhexaad ah ama daran maalinta ballanta tallaalka la qabto ayaa ah inuu sida caadiga ah sugo illaa u qofkaasi roonaanayo kahor intuuna qaadan tallaalka Tdap ama Td. Qofka qaba jirrada sahlan ama leh xummad hoose ayaa sida caadiga ah la tallaali karaa.

5 Waa maxay halista ka iman karta tallaallada Tdap iyo Td?

Tallaalka, sida daawo kasta oo kale, waxa jiri kara had iyo jeer halis yar oo dareen-celin ama alerji ah oo nolosha khatar galisa ama dhibaato kale oo daran.

Suuxdin kooban iyo astaamo la xidhiidha (sida dhaqdhaqaqyo gundhin leh gariir) ayaa dhici karaa ka dib hawl caafimaad oo kasta, oo uu ku jiro tallaalku. Fadhiga ama jiifsadka illaa 15 daqiiqo kadib tallaalka wuxuu caawin karaa kahortagga suuxdinta iyo dhaawacyada ay keento dhicistu. U sheeg dhakhtarkaaga haddii bukaanku uu dawakhsan yahay ama wareersan yahay, ama aragiisu isbeddelayo ama dhagahiisa wax u shanqadhayaan.

Qaadista cudurrada teetanaha, gawracatada iyo xiiqdheerta ayaa u badan tahay inay horseedaan dhibaatooyin daran marka loo eego qaadashada Td ama Tdap.

Dhibaatooyinka laga warbixiyay marka la qaatay tallaallada Td iyo Tdap ayaa hoosta ku qoran.

Dhibaatooyin Aan Darnayn

(La dareemi karo, laakiin aan qofka ka dhexgalin waxqabadyada)

Tdap

- Xanuun (qiyaastii 3 ka mida 4-tii dhowr iyo toban jir iyo 2 ka mida 3-dii qaangaar ah)
- Casaan ama barar barta tallaalka (qiyastii 1 qof 5-tii qofba)
- Xummad sahlan oo ugu yaraan ah 100.4°F (illaa qiyaastii 1 ka mida 25-kii dhallinta dhowr iyo toban jirka ah iyo 1 ka mida 100-kii dadka qaangaarka ah)
- Madax xunuun (qiyaastii 4 ka mida 10-kii dhallinta dhowr iyo toban jirka ah iyo 3 ka mida 10-kii qaangaar ah)
- Daallanaan (qiyaastii 1 ka mida 3-dii dhallinta dhowr iyo toban jirka ah iyo 1 ka mida 4-kii qaangaar ah)
- lallabo, matag, shuban, calool-xanuun (illaa 1 qof 4-tii dhallinta dhowr iyo toban jirka ah iyo 1 qof 10-kii qaangaar ah)
- Qadhqadhyo, jidh-xanuun, xubnaha oo damqada, furuuruc, qanjidhada oo barara (aan caadi ahayn)

Td

- Xanuun (illaa 8 ka mida 10-kii qof)
- Casaan ma barar lagu yeelasho barta laga duray qofka (illaa 1 ka mida 3-dii qof)
- Xumad sahlan (illaa 1 ka mida 15-kii qof)
- Madax xanuun ama daallanaan (aan caadi ahayn)

Dhibaatooyinka Dhexdhexaadka ah

(Ka dhexgashay waxqabadyada, laakiin uma baahnayn wax ka qabasho caafimaad)

Tdap

- Xanuun ka jira barta tallaalka (qiyaastii 1 qof 20-kii dhowr iyo toban jirayaal iyo hal qof 100-kii qaangaar ah)
- Casaan ama barar ay yeelato barta laga duray qofka (illaa 1 ka mida 16-dii qof dhallinta dhowr iyo toban jirka ah iyo 1 ka mida 25-kii dadka qaangaarka ah)
- Qandho ka badan 102°F (illaa 1 qof 100-kii dhawr iyo toban jir ah iyo 1 ka mida 250-kii qaangaadh)
- Madax xanuun (1 ka mida 300)
- Lallabo, matag,shuban, calool-xanuun (illaa 3 qof 100-kii dhallinta dhowr iyo toban jirka ah iyo 1 qof 100-kii dadka qaangaarka ah)

Td

- Xummad ka sarreysa 102°F (aad bey u yar tahay)

Tdap ama Td

- Gacanta oo si aad u ballaaran uga bararta meesha tallaalka laga siiyay (illaa 3 ka mida 100-kii qof).

Dhibaatooyinka Daran

(Aan karti u yeelan fulinta waxqabadyada caadiga ah; u baahan wax ka qabasho caafimaad)

Tdap ama Td

- Bararitaan, xanuun daran, dhiigitaan iyo gacanta oo guduud ka noqota barta tallaalka laga qaatay (waa dhif).

Xasaasiyad ama alerji daran ayaa dhici kara ka dib siinta tallaalka kasta. Waxa lagu qiyaasayaa inay dhacdo in ka yar hal markay yihiin hal milyan oo ah qiyaaso tallaal.

6 Maxaa dhacaya haddii ay jiraan dareen-celin ama xasaasiyad daran?

Maxaa ila habboon inaan u fiirsado?

Xaalad kasta oo aan caadi ahayn, sida dhibtaato xasaasiyad daran ama xumad sare. Haddii dhibaato alerjiyo daran dhacdo, waxay dhacaysaa dhawr daqiiqadood gudahood illaa saacad kadib tallaalka. Calaamadaha halista ah ee dhibaatada xasaasiyad ama alerji daran waxaa ka mid ah **neefta oo ku qabata, tamar darro, xabeebasho ama hiinraag, wadnaha oo degdeg kuu garaaca, finan maqaarka ah, dawakhaad, dhiig cadaad,** ama **cuno-barar.**

Maxaan sameeyaa?

- La hadal dhakhtar, ama qofka dhakhtarka u gee isla markiiba.
- U sheeg dhakhtarkaaga waxa dhacay, taariikhda iyo waqtiga ay dhacday, iyo markii tallaalka la qaatay.
- Weydii bixiyahaaga daryeel caafimaad inuu warbixin ka baxsho dhibta uu talaalku kuu gaystay isagoo buuxinaya warqadda Nidaamka Ka Warbixinta Dhacdada Daran ee Tallaalka (Vaccine Adverse Event Reporting System) (VAERS). Ama waxaad ku xerayn kartaa warbixintan websaaydka VAERS ee ku taal **www.vaers.hhs.gov**, ama adiga oo waca **1-800-822-7967**.

VAERS ma bixiso talo caafimaad.

7 Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka

Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka (VICP) waxaa la abuuray badhtameeyihii sannadkii 1986.

Dadka rumaysan inuu tallaal dhaawacay waxay wax ka ogaan karaan barnaamijka iyo sida loo xereysto cabasho iyagoo wacaya **1-800-338-2382** ama booqanaya websaaydka VICP **www.hrsa.gov/vaccinecompensation**.

8 Sidee baan macluumaad intaas dhaafsiisan u ogaan karaa?

- Dhakhtarkaaga ayaa ku siin kara xirmo qoraal oo ku saabsan tallaalka ama waxay kugula talin karaan ilo kale ood macluumaad ka heli kartid.
- Wac waaxda caafimaadka xaafadda ama gobolkaaga.
- La Xidhiidha Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurada (CDC):
  - Waxaad wacdaa **1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)** ama
  - Waxaad booqataa bogga internetka ee CDC **www.cdc.gov/vaccines**

Vaccine Information Statement (Interim)

Td & Tdap Vaccines

1/24/2012 Somali

42 U.S.C. § 300aa-26

Translation provided by the Immunization Action Coalition